



DAWLADDA FEDERALKA AH EE SOOMAALIYA
WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA IYO DALXIISKA

Taariikh: 28 -06-2015

Ogeysiis

Wasaaradda Warfaafinta Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay ogeysiineysaa in ay qaadaneyso wariyeyaal, Barnaamij soo saareyaal iyo khubaro aqoon u leh hawlaha Warbaahinta, IT iyo Website-ka, kuwaasoo ka hawl geli doono Warbaahinta Dawladda sida SNTV, Radiyo Muqdisho iyo Website-yada

Haddaba dadka soo codsanaya shaqooyinkan, ayaa laga doonayaa shuruudaha soo socda:-

A- Barnaamij soo saareyaal (Producers) 5 qof

Dadka soo codsanaya waxaa laga doonayaa shuruudaha soo socda:-

- 1- Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed , waxaana tix gelin goonni ah la siin doonaa shahaaddooyinka saxaafadda la xiriira.
- 2- Waa si fiican u yaqaanno luqadaha Carabiga ama English-ka labadaba ama midkood (Ku hadal iyo Qoraal).
- 3- Waa in uu si wanaagsan u yaqaanno qoraalka afka Soomaaliga, uuna ku diyaarin karo warbixinno, u turjumi karo kana soo turjumi karo luqadda uu ku fiican yahay.
- 4- Waa inuu khibrad iyo karti u leeyahay in uu soo saaro barnaamijyo xiiso leh oo Idaacadeed iyo kuwo Telefishan.
- 5- Waa in uu soo gudbiyaa caddeyn la xiriirta shaqooyinka uu soo qabtay ee xirfaddiisa la xiriira
- 6- Waa in uu si fudud u isticimaali karaa Computer-ka, aqoon fiicanna u leeyahay xirfadaha Computer-ka
- 7- Waa inuu soo diraa CV-ga oo ah mid kii ugu dambeeyay (Updated CV)

B- Wariyeyaal 5 qof

1. Waa in uu yahay qof xirfad ahaan jecel saxaafadda uuna leeyahay hal abuur la xiriira xirfadda
2. Waa in uu haystaa shahaado Jaamacadeed, iyadoo tixgelinta koowaad la siinayo qofka haysta shahaado ama waayo aragnimo la xiriirta Warbaahinta.
3. Waa in uu si fudud u isticimaali karaa Computer-ka, aqoon fiicanna u leeyahay xirfadaha Computer-ka
4. Waa inuu afka Soomaaliga qoraal iyo akhrisba uu aad ugu wanaagsan yahay.
5. Inuu leeyahay ugu yaraan khibrad Idaacad ama Tv ugu yaraan 2 sano .
6. Inuu keeno wareysiyo , doodo, warbixinno iyo wixii la mid ah ee caddeenaya shaqooyinkii uu ka soo qabtay warbaahintii uu ka soo shaqeyay.
7. Inuu diyaar u yahay inuu maro imtixaan qoraal iyo codka ah (Written Test and Voice Test)

8. Inuu aqoon buuxda u leeyahay juquraafiga iyo dhaqanka Soomaaliya, islamarkaana uu xog fiican ka hayo Siyaasadda Soomaaliya.
9. Waa inuu yahay qof si gaar ah waayo aragnimo ugu leh farsamooyinka wareysiyada , haggidda doodaha , soo jeedinta warbixinnada, iyo soo saarista barnaamijyada.
10. Waa inuu aqoon buuxdaa u leeyahay anshaxa Saxaafadda, uuna yahay qof hal abuur leh.
11. Sidoo kale waa inuu yahay qof ku wanaagsan wadashaqeynta , islamarkaana uu yahay qof dulqaad leh xilliga lagu jiro wadashaqeynta adag ee Saxaafadda.
12. Waa inuu si wanagsan u yaqaano luqadaha, English ama Carabiga ama midkood ama labadaba qoraal ahaan iyo akhrisba.
13. Waa inuu yahay qof u diyaar ah tabababar xagga Saxaafadda ah
14. Waa inuu soo diraa CV-ga oo ah mid kii ugu dambeeyay (Updated Cv)
15. Waa inuu keenaa warqad Caddeynaysa hey'adihii warbaahineed uu ka soo shaqeeyay (Reference Letter)

Fiio Gaar ah: Barnaamij soo saareyaashu waxay shuruudaha xirfadda la xiriira la wadaagaan wariyeyaasha.

C- Khabiir Computerrada (IT Expert) 2 qof

- 1- Waa inuu haystaa shahaaddo la xiriirta xirfadda IT-da oo ay bixisay hay'ad la aqoonsan yahay.
- 2- Waa in uu cillad bixin karaa comptur-rada, hagaajin karaa Networks iyo wax kasta oo xiriir la leh IT-da
- 3- Waa in uu leeyahay khibrad la xiriirta xirfaddiisa ugu yaraan labo sano.

D- Naqshadeynta iyo Horumarinta Website-yada (Web Designer and Developers). 2 qof

- 1- Waa in uu leeyahay shahaaddo la xiriirta xirfadda Web design-ka oo ay bixisay hay'ad la aqoon san yahay.
- 2- Waa in uu aqoon fiican u leeyahay dhismaha iyo horumarinta website-yada
- 3- Waa in uu si dhaqso ah u xallin karaa cilladaha ku yimaada website-yada
- 4- Waa in uu soo soo gudbiyaa website-yo uu horay u dhisay.

E- Graphic Designer (TV-ga Qaranka) hal qof

1. Waa in uu haysto shahaaddo Jaamacadeed oo la xiriirta xirfadan.
2. Waa in uu leeyahay qibrad aan ka yareyn 3-sano oo uu ku soo shaqeeyey xirfadan.

FG: Araaji qabashada waxa ay ku egtahay 5-ta bisha Agoosto ee soo socota.

Codsadayaashu waxay CV-yada iyo xogtooda u soo gudbinayaan, wixii aqbaaraad ahna kala soconayaa Telephone-da iyo Email-addan Hoos ku qoran

Tel: 061-768 3712 ama 062 9333222 Email sidiqfaarax@gmail.com

Tel: 061 5009881 Emil aahaybe@gmail.com